

Xafiisyada Laamaha:

1700 - 155 Carlton St.
Winnipeg MB R3C 3H8
Tel. 204-945-2476
Tel. lacag la'aanta:
1-800-782-8403
Faks: 204-945-6273
E-mail: rtb@gov.mb.ca

143-340 9th Street
Brandon MB R7A 6C2
Tel. 204-726-6230
Tel. lacag la'aanta:
1-800-656-8481
Faks: 204-726-6589
E-mail:
rtbbrandon@gov.mb.ca

113-59 Elizabeth Dr.
Thompson MB R8N 1X4
Tel. 204-677-6496
Tel. lacag la'aanta:
1-800-229-0639
Faks: 204-677-6415
E-mail:
rtbthompson@gov.mb.ca

The Residential Tenancies Branch Laanta Kirada Deegaanka

WARQADDA XAQIIQADA

Kordhinta Kirada

Inta badan kiisaska, milkiilaha hantida wuxuu sharci ahaan kordhin karaa kirada hal mar 12dii bilood. Sannad kasta, dawladda waxay xad u sameysaa xisaabta lagu kordhin karo kirada. Xadkaan waxaa lagu magacaabaa nidaamka kordhinta kirada. Booqo bogga internetka Laanta ee laga helo www.manitoba.ca/rtb si aad u aragtid nidaamyada ku saabsan kordhinta kiradii la soo dhaafay iyo tan iminka jirta.

Sidee ayuu milkiilaha hantida u kordhin karaa kirada?

Milkiilaha hantida waa in uu kiraystaha siiyo ogeysiis ku saabsan kordhinta kirada muddo saddax bilood. Ogeysiiskan waa:

- in uu qoran yahay
- in uu muujiyo inta kirada tahay iminka
- in uu muujiyo inta kirada noqon donto, doolar ahaan iyo boqolkiiba xisaabta (tusaale ahaan: tan waa kordhin la'eg \$15.00 ama 3%);
- in uu sheego inta milkiilaha hantida loo ogol yahay in uu ku kordhiyo kirada
- in uu sheego taariikhda kordhinta bilaaban doonto
- in uu sharaxo in kordhinta aysan ahayn sharci haddii kiraystaha aan la siinin saddax bilood oo ogeysiis ah
- in uu muujiyo nidaamka u dagan kordhinta kirada sannad kasta, tusaale ahaan 1.5%
- in uu sheego in kiraystaha xaq u leeyahay in uusan waafaqin xisaabta lagu kordhiyay kirada

Sidoo kale, milkiilaha hantida waa in uu Laanta Kirada Deegaanka siiyo ogeysiis qoran oo ku saabsan kordhinta kirada muddo 14 maalin gudahooda kaddib marka uu u sheego kiraystaha.

Maxay sameeyn karaan kiraystayaasha?

Haddii kiraystaha uusan waafaqin xisaabta lagu kordhiyay, waxay warqad gaarsiin karaan Laanta Kirada Deegaanka, taasoo sharaxaysa sababta. Warqadda waa in ay soo gaarto Laanta ugu yaraan muddo 60 maalin ka hor inta kordhinta kirada aysan bilaabanin.

Kordhinta ka sareeyso inta ugu badan

Milkiileyaasha raba in ay kirada ku kordhiyaan in ka sareeyso inta ugu badan waa in ay marka hore ogolaasho ka helaan Laanta Kirada Deegaanka. Milkiilaha waa in uu qoraal ku soo dalbado ogolaashada. Waa in ay soo dalbadaan muddo 14 maalin gudahooda laga bilaabo marka ay ogeysiiska siiyaan kiraystaha.

Kiraysteyaasha waxay arki karaan, kana bixin karaan faalo dalabka milkiilaha ee ku saabsan kordhinta kirada. Milkiilaha wuxuu arki karaa, kana bixin karaa faalo macluumaadka uu bixiyay kiraystaha. Laanta Kirada Deegaanka ayaa kaddib go'aan ka gaari doonta inta la kordhin karo kirada. Go'aankaan wuxuu saameyaa dhamaan unugyada la kiraysto ee ka tirsan blogga ama dhismaha.

(fiiri bogga xiga)

Qaadashada racfaan la xariira go'aanka

Haddii milkiilaha hantida ama kiraystaha aysan isku waafaqin go'aanka kordhinta kirada, waxay xaq u leeyahiin in ay racfaan ka qaataan una gudbiyaan Guddiga Kirada Deegaanka oo laga helo 1650-155 Carlton Street, Winnipeg MB R3C 3H8, muddo 14 maalin gudahooda laga bilaabo marka la helo go'aanka Laanta Kirada Deegaanka.

Guddiga wuxuu magacaabi doonaa guddi hoose oo fiiriyaa racfaanka. Gudoomiyaha dawladda, wakiilka milkiilaha iyo wakiilka kiraystaha ayaa ka mid noqon doono guddiga hoose. Gudigga hoose ayaa qabanqabi doono shir ama dhageysi. Waxaa horay loo ogeysiin doonaa qof kasta oo lug leh. Dhageysiga kaddib, Gudigga Kirada Deegaanka ayaa gaari doona go'aan. Go'aanka Gudigga waa kama dambeys.

Sharciyada kordhinta kirada ma waxaa lagu dabaqaa qof kasta oo kiraysto?

Sharciyada waxaa lagu dabaqaa unugyada la kiraysto inta badan, sida guriga, guryaha labo labada isugu dhaggan, ama qolalka ku dhex yaal guri ama dhismaha abarmanka.

Hase ahatee, nidaamka kordhinta kirada laguma dabaqo unugyada soo socda:

- unugyada kirada cusub; haddii dhismaha la daggan yahay la dhisay lana daggay bisha Abriil 9, 2001 kaddib, waxaa laga dhaafaa muddo 15 sanno; haddii dhismaha la daggan yahay la dhisay lana daggay bisha Maarso 7, 2005, waxaa laga dhaafay muddo 20 sanno
- unugyada lagu kirayo in ka badan xisaab cayiman; waxaa isbedeli kara xisaabtaan sannad kasta; ka saxo bogga internetka Laanta ee laga helo www.manitoba.ca/rtb si aad u heshid macluumaadka ugu dambeeyo ama si aad ula xariirtid Laanta
- unugyada ay maamulaan, ama loo maamulo, Dawladda Canada, Dawladda Manitoba ama dawladda hoose
- unugyada xanaaneyaha/shaqaalaha
- dhismooyinka laga kirayo qofka ilaa inta uu nool yahay, kuna saleysan maamulka samofalka

Xattaa haddii aan lagu dabaqi karin nidaamka, kiraystaha waxaa weli laga rabaa in uu kiraystaha siiyo ogeysiis ku saabsan kordhinta kirada muddo saddax bilood.

Si aad u heshid macluumaad badan

Warqadaan xaqiiqada waa sharaxaad gaaban oo keliya. Si aad u heshid macluumaad badan, la xaiir:

Laanta Kirada Deegaanka